AUSCO

Barnaamijka Tilmaan-siinta Dhaqaneed ee Australia

# Shoog-ka-qaadista dhaqanka

Akharinta Fudud



Waa wax dabiici ah inaad ku dheganaato dabeecadaha qaarkood markaad ka tegayso wadankaaga una guurto wadan cusub.



Waxaad qaadan doontaa:

- shaqsiyaddaada iyo aqoonsigaa – qofkaad tahay



- hab-dhaqanka – sidaad noloshaada u noolaanayso



Markaad timaado wadan cusub oo leh siyaabo ka duwan sidaad wax u qabato, waxaad dareemi kartaa:

- buuqsanaan
- xanaaqsanaan
- caraysnaan
- hubin la'aan
- ku-tiirsanaan dad kale



Haddii ay sidaas kugu dhacdo, waxaad qabi kartaa Shoog-ka-qaadista dhaqanka.

Waa iska caadi Shoog-ka-qaadista dhaqanka.



Way ku dhacdaa badiba dadka markay yimaadaan Australia, ama wadan kaleba.



Keligaa ma tihid.

Waa falcelis caadi ah ee isbaddallada waaweyn oo ku dhaca noloshaada.

# 4ta marxaladood ee shoog-ka-qaadista dhaqanka.

Waxaa jira 4 marxaladood ee shoog-ka-qaadidda:

1

Shahrul-casalka – wax kastaa waa cusub yahay waana cajiib.

2

Shoog-ka-qaadidda dhaqanka – wax kastaa waa qariib waa buuqsanaan.

3

La-qabsiga – waxaad la qabsanaysaa nolosha cusub.

4

Hanasho – waxaad si wacan u qabanaysaa waxyaalaha nolosha cusub ah.




In aad wax badan ku ogaato kaas oo ku saabsan marxaladahan waxaad awoodi doontaa inaad xakamayso dareenada iyo waayo-aragnimada aad leedahay.

## 1

**Shahrul-casalka**



Markaad timaaddo Australia waxaad leedahay:

- rajooyin sare
- filanshooyin waaweyn



Wax kasta waxaad u aragtaa inay ku-soo-jiidanayaan waana kuu cajiib adiga.

## 2

**Shoog-ka-qaadista dhaqanka**



Waxaad mashquul ku tahay:

- waxyaalo badan oo aad u baahan tahay inaad qabato



- dhibaatooyinka aad doonayso inaad xalliso
  - helidda guri aad ku noolaato



- helidda shaqada



- dhigashada dugsiga si aad Ingiriisiga u barato



Waxaad dareemaysaa:

- niyad-jab



- buuqsanaan



- yaxyax



- cabsida



- carada



- dambi-dareen



- murugo



Waxaad kaloo:

- waayaysaa noloshaadii hore ee hoygaagii hore



- dhibaato kaa haysaa hurdada ama inaad aad u daallan tahay




- luminaysaa rabitaanka cuntada iyo inaadan doonayn inaad wax cunto



- dareemaysaa inaadan waxba danaynayn

3

**La-qabsiga**



Waxaad haysataa waayo-aragnimooyin badan.



Ingiriisigaagu wuu sii hagaagayaa.



Waxaad bilaabaysaa inaad dareento kontaroolka noloshaada.



Waxaa laga yaabaa inaadan weli hubin wax ku saabsan waxyaalaha qaarkood. Way adag tahay si aad gaarto filanshooyinkaaga.

4

**Hanashada**




Waxaad hadda leedahay howlo joogto ah.



Waxaad la-qabsatay sida waxyaalaha looga qabto wadankaaga cusub.



Kuwaasna waxaa ka mid ah:

- luqadda



- caadooyinka



- kastamada



- cuntada



- dadka

# La-qabsiga noloshaada cusub



Dadka Australia qof kastaa wuxuu ku faanaa dhaqankooda iyo asalkooda.



Waxaad kaloo dhaqankaaga la wadaagi kartaa



Waxaa jira waxyaalo aad samayn karto si aad ula qabsato nolosha cusub.

## Daawo, dhagayso lahowna maskax furan



Waxaa laga yaabaa inaadan hubin xeerarka bulshadeed ee Australia ka jira.




Dadku waxay uwada xiriiraan siyaabo kala duwan:

- si af ah – hadlidda iyo adeegsiga erayada
- si aan af ahayn – adeegsiga luqad jidheedka iyo tilmaamaha



Isku-day inaad si taxadar leh u dhagaysato waxay dadku leeyihiin.



u-fiirso luqadda jidheed – habka dadku u adeegsado:

- wejiga
- indhaha
- jidhka
- gacmaha



Wax badan ayaad ka baran kartaa sida dadku u wada-xiriiro.

## Weydii su'aalo



Waxaad arkaysaa dadka inay waxyaalo ku sameeyaan Australia kuwaas oo kuugu muuqda qariib ama khalad adiga.



Waxyaalahaas aad aragto caadi bay ka yihiin Australia.



Waxaa laga yaabaa inaadan fahmin wax dhacay sababtoo ah wax badan ka garanmaysid oo ku saabsan arintaas.




Weydii dadka aad ku kalsoon tahay wax ku saabsan waxyaalaha aadan fahmayn.

## Hayso dareenkaaga himadda ah



Waa suurtagal inaad qaladyo samaysid isla markii intaad baranayso noloshaada cusub iyo dhaqanka.



Haddii aad ku qosli karto qaladkaas waxay kugu caawinaysaa inaad:

- barato
- la-qabsato
- ku raaxaysato waayo-aragnimadaada guud

## Walaaca iyo niyad-jabka



Barashada in lala qabsado dhaqanka cusub maahan wax fudud.

Markaad dhexgalayso dadka ka soojeeda dhaqannada kale waxaa kugu adkaan karta si aad ugula xiriirto waxaad runtii ujeeddo.



Haddii ay taasi dhacdo, waxaad dareemi kartaa:

- walaac – inaad ka walaacsan tahay waxyaalaha si qaldan u dhacaya
- niyad-jabsan – ka walaacsan inaadan waxba ka baddeli karin waxyaalaha




Haddii aad fahamto in dareenadaas ay caadi yihiin, waad awoodi doontaa inaad si fiican ula qabsato.

## Ka-qaybgal howlaha bulshadaada



Waxaa ka jira qiyam badan iskudayga:

- in la fahmo dhaqanka cusub
- in waayo-aragnimo loo yeesho habka nolosha cusub



Iskuday inaad:

- dibadda u baxdo



- la kulanto dad cusub




- folanteer noqo – samee shaqo aan mushahaari ahayn taas oo dadka kale caawinaysa



- ka-qaybqaado nashaadyada iyo munaasabadaha bulshada



Taasi waxay kaa caawinaysaa inaad:

- wax ka barato Australia



- la-wadaagto dhaqankaaga dadka Australiyaanka ah

## Samee waxyaalaha ku siinaya rajada mustaqbalka wacan



Isku-day inaad u-aragto maalmaha hore ee Australia inay yihiin hal weji oo noloshaada ah – bilowga rajadaada mustaqbal wacan.



Aad fasallada Ingiriisiga.



Waxay:

- kuu ogolaanayaan inaad qayb ka noqoto bulshadaada



- caawinayaan qabka-naftaada – siday u wacan tahay inaad dareento shaqsiga aad tahay

## Si joogto ah u-samee wax adiga kuu gaar ah



Samee xoogaa jimicsi ah:

- samee socod ama orod
- fuul baaskiil




La-kulan saaxiibadaada.



Isku day hiwaayad cusub – wax uun aad jeceshahay inaad qabato sababtoo waad ku raaxaysataa – ama bilow samaynta hiwaayad hore mar labaad.



Waxaad:

- beeri kartaa jardiinka qudaarta



- baran kartaa sida
  - loo cayaaro aaladda muusikada
  - Sawir loo midabeeyo
  - loo dheelo cayaaraha